Dugsiga Curley K-8

Buugga Gacanta ee Waalidka

2018-2019

Dugsiga "Upper"
493 Centre Street
617-635-8176

Dugsiga "Lower"
40 Pershing Road
617-635-8239

Websstka Curley K-8 School - www.curleyk8.com

Sibteembar 27, 2018

Waalidiinta/Masuuliyiinta Qaaliga ahoow,

Kusoo dhawoow Curley K-8 School! Shaqaalaha dugsiga Curley iyo anigga ayaa kugusoo dhawaynayna bulshada dugsiga. Sida kucad bayaanka higsigeena, "*Hadaan nahay dugsiga Curley K-8 School waxaan daryeelnaa nafteena, shaqsiyaadka kale iyo bulshadeena. Anagoo kushaqaynayna koox ahaan, adeegsanayna macluumaadka, kawada shaqaynayna hawlaha waxbarida, iyo taageerooyinka bulshada ardaydeena ayaa guul kagaaraaya dhinacyada aqoonta bulshada"*

Bogaga buugaan gcanta waxaa lagu buuxshaa macluumaad muhiim ah oo laxariira xeerarka dugsiga iyo nidaamyada laraacaayo. Waalidiinteena iyo ardaydeena ayaa dib u eegis kusamaynaaya mawduuca. Hadaad qabto wax su'aalo ah, fadlan lasoo xariir xafiiska dugsiga (617-635-8239 ama 617-635-8176). Waxaan siwayn udareemaynaa in xariir furan oo qeexan uu muhiim uyahay guusha barnaamijkeena waxbarasho. Waalidiinta Curley ayaa ah iskaashatadeena nagala qayb qaata shaqadaan muhiimka ah ee waxbarida caruurta bulshadeena.

Maalinta koobaad ee dugsiga macalinka cunugaaga ayaa cunuaaga usoo dhiibaaya inuu guriga keeno waraaqo muhiim ah oo lagusoo ridaayo sanduuqa isgaarsiinta macluumaadkaas oo ay tahay inaad cunugaaga la akhrido, aadna saxiixdo kadibna dugsiga kusoo celiso sida ugu dhakhsaha badan. Fadlan hakacabsan inaad laxariirto dugsigaaga hadaad qabto wax su'aalo ah.

Mahadsanid,

Katie Grassa
Maamulaha

Curley K-8 School
Xeerka Anshaxa

Sanadkaan kuliyadaadu waxay siiwadaysaa dhaqangalinta taageerooyinka heer caalami ee habdhaqanka wanaagsan (PBIS) si loo xaqiijiyo dhamaan ardaydu helaan waxbarasho qeexan oo joogto ah taasoo waafaqsan mabaadii'deena inta lagu jiro maalinta dhan ee dugsiga iyo sanad dugsiyeedkasta ooy dhiganayaan dugsiga Curley. Waxaan siwayn u aaminsanahay in soobandhigida waxbarasho ardayda siinaysa xifado bulsho iyo dareen ay qayb muhiim ah katahay waxbarashadooda fasal kasta.

Waxaan leenahay sadex higsi oon wax kubarno ardayneeda:

Shaqaalaha Curley K-8

K1	K2	Fasalka 1	Fasalka 2	Fasalka 3
Laura Merdkhanian Jeannie Park Hoda Hindeyeh/Eva Banks Jenny Goldstein	Traka Smith Carolyn Silva-Sanchez Emily Beck Laura Shea Elaine Cronin	Jenni Craman Sara Silverstein Laurie Ciardi Helenia Solomini Janet McDavitt Elaine Cronin Maureen Cullen Peter Mullin	Connie Redden Christina Burke Paola Locke Waverly Kidd Patty Garcia Peter Mullin	Konstantinos Petmezis Heide Signes Nelly Rivera Deirdre Anderson Joanne Mylett Laura Negoshian Julia Badiali
Fasalka 4	**Fasalka 5**	**Fasalka 6**	**Fasalada 7/8**	**Hormarinta Luuqada Ingiriiska 6-8**
Lindsey Wright Meron Tefera Brandi Phillips Laura Strait Leida Arroyo Teresa Javaloyes Audra Bowsky	Debbie Bryson Linda Solomon-Key Kate Davis Danielle Moran Kim Daly Alicia Green Gennaro Theresa Brophy	Sharon Ennis Amy Lieberman Noraa Ricketts Sylvia Rua Annette Beaudrault Danielle West Colin McDougall Sara Quatrale	Craig Melzer Alissa Ferro Rozelta Boyd Tracy Young Olivia Peters Annette Beaudrault	Maria Amy-Moreno Nina Wessen Jordi Lotito
Ardayda Leh Waxbarashada Kooban ama Kalgo'day (SLIFE)	**Luuqada Ingiriiska oo loobaro sida luuqadooda labaad (ESL)**	**Diyaarinta ardayda ee Dhinacyada Bulshada iyo Aqoonta 6-8 (SAR)**	**Macamiliinta Barida Habdhaqanka Wanaagsan**	**Tababarayaal**
Candida Mundo Leah Travers	Peter Mullin Charles Tewksbury Viola Pike	Kiki Iatrou Dawn Avery Lesley Peck-Oser	Kristen Mitchell Taylor Bresnahan Katie Baulier Erin Devine Hadley Keohane Kristin Clark Kandi Quarterson Tristan Maiden	Liz Spring - PACE Cassie Mountain - PACE Meg Nason - Inclusion Caitlyn Gable -Literacy K-2 Eileen Cronin- Literacy 3-8
Khubarada Habdhaqanka Wanaagsan	**Kaaliyaasha socdaalka**	**Kaaliyaasha macalimiinta**	**Kormeerayaasha Qadada**	**Khubarada**
Kafunda Banks Jenn Cuartas Jackie Felteau Erin Fitzpatrick Kristen Haws Carlos Marin Amanda Quimby Laurie Shapiro Drew Belsinger Emily Wipper	Regan Andrade - SLP Debra Aviles - MTDHH Wendelyn Carruthers - SLP Suzanne Demarco - SLP Christine Fry - OT Jonathan Hatch - SLP Gloria Herrera - OT Kim Lee - SLP Ellen McCrave - PT Jennifer Richards - SLP Mark Spolidoro - APE Diana Rosero - SLP Kelly Van Clief - OT Valerie Mantis - TVI Meghan Aycock - O&M	Michelle Andrade-K2 Michelle Araujo-ABA Shauna Bennett-K1 Geju Brown-SAR Andria Butler-4th Clelia Camacho-K1 Torri Canada- ABA Monica Cawley-ABA Jeanette Ellis-ABA Arleta Faulkner- ABA Patricia Freeman- ABA Adalberto Guerrero- ABA Marietje Halbertsma- K1 Maria Kamberidis- ABA Cara Macdonald- ABA Katelyn McIrney- ABA Erica Mercado- SAR Maryclare Moran- SAR Maria Navarro- SAR Angela O'Neil- ABA Blanca Pereira- SAR Janina Rickard-Vickers-ABA S. Reid- ABA Noris Rosado- K1 Mary Ryan- K1	Maritza Bonilla Margarita Cruz Marcia Mello Princess Ortega Gladys Rodriguez Elaine Simmons Claudia Viaud Keon Hill Hazel Hernandez	Anna Youman - Farshaxanka Peter Pizzi- Farshaxanka April Bello- Farshaxanka Emanuela Alves - Muusiga Melanie Bourgeault - Muusiga Kim Taylor Knight - Qoob kaciyaarka Ava Untermyer- Qoob kaciyaarka Michael Bertoni - Waxbarashada Jirdhiska Adrience Dancy - Waxbarashada Jirdhiska John DePalm - Waxbarashada Jirdhiska Mark Righini - Waxbarashada Jirdhiska Linda Griffith Genet Mehari - Sayniska

		Janise Colon - ABA Mary Thomas - ABA Lourdes Vasquez- K2 Nubea Martorell -ABA Sharon Bellenis - ABA Katie Pulsifer - ABA Tim Konowski - ABA Blanca Pereira - SAR Lindsey Deneault - K2 Julie White - ABA		
Tusmada	**Kalkaalinta**	**Waxbarashada Gaarka ah**	**Xafiiska Wayn**	**Maamulayaasha**
Sugeily Santos Fasalada 4-8 Cristina Silva K-3	April Pumphret Keilah Santana	Jessica Burque K-3 iyo ASD Renee Ward Fasalada 4-8 iyo SAR	Kathleen Powers - Dugsiga Hoose Madeline Vazquez - Dugsiga Dhexe	Katie Grassa - ***Maamule*** David Diaz - ***Kaaliyaha Maamulaha*** **Adrian Ward-Jackson** - *Agaasimaha Hormarinta Xirfada iyo Codsiyada* **Lindsey Morgan** - *Agaasimaha Macmuulaadka, Hormarinta iyo Dhaqanka*

Saacadaha Dugsiga: Saacadaha dugsigu furanyahay Sanad Dugsiyeedkeena 2018-2019 waa 8:30-3:10 PM dhamaan ardayda. Dhamaan ardaydu waa inay dugsiga yoogaan ayagoo diyaar u ah inay waxbartaan markay saacadu gaarto 8:30 AM. Xeerkaan si adag ayaa loogu dhaqmayaa.

Udiyaar Garoowga Dugsiga: Ayadoo ardaydu dugsiga aadayaan maalinkasta, fadlan xaqiiji inay wataan waxkasta ooy ubaahanyihiin maalintaas ay dugsiga jogaan: boorsada buugaagta, buugta, layliga gurigga, waraaqaha saxiixan, iwm. Fadlan ha u ogolaanin cunugaaga inuu sooqaato boonbalayaashiisa aa aalada elegtaroniga ah markuu dugsiga imaanaayo. Dhamaan alaabaha cunugaaga waa inuu kuqoranyahay magaca cunugaagu si qeexan. Fadlan keen waxyaabaha uu soo ilaawo sida qadada, buugaagta, lacagta, iwm. xafiiska si looga fogaado in carqalad lagaliyo fasalka uu ardaygu kujiro.

Maalinta Koobaad ee Dugsiga Ardayda Barbaarinta Kujirta: Keenista cunugaaga maalinta koobaad ee dugsiga xanaanadu waxay noqon kartaa mid dhibaato badan dareen gaar ahna uleh ardayda iyo qoysaskooda. Waxaan codsanaynaa inaan waalidiintu soogalin dhismaha di=ugsiga asbuuca koobaad. Macalimiina fasalada K0, K1 iyo K2 ayaa istaagaaya aaga fagaaga hore ee wadada Pershing Road oo marta ilinta fasalada K1 si ay ula kulmaan ardayda.

Soogalitaanka: Ardayda dugsiga usoo lugeeya ama waalidkood keeno dugsiga waa inay xayndaabka dugsiga soogalaan laga bilaabo 8:15 AM. Caruurta waxaa lagu kormeerayaa dhismaha laga bilaabo 8:15. **Haday ardaydu soogalaan kahor saacada 8:15, twaxaa qasab ah inay kaqaybgalaan barnaamijka dugsiga kahor.** Xeerkaan waxaa loodiyaarshay si loosugo badqabka ardaydeena. Ardayda utimaada inay kaqaybgalaan barnaamijka dugsiga kahor (inta udhaxaysa saacadaha 7:00 iyo 8:15 AM) waa inay yimaadaan alabaabka hore ayna soomaraan xafiiska wayn. Marka araygu soogalo xeendaabka dugsiga, looma ogolaan doono inuu dugsiga kabaxo. Waalidiinta doonaaya inay lakulmaan macalinka cunugooda ama ay arkaan cunugooda inta lagu jiro dugsiga maalintii, waxaa QASAB ah inay soomaraan xafiiska wayn marka hore. Waalidiinta/masuuliyiinta aada fasalka cunugooda waa inay wataan gaarka martida. Kuxadgudubka xeerkaan amaan sgida ah ee muhiimka ah waxay keeni kartaa in laqabto shirka waalidka.

Bixitaanka ardayda: Ardayda waxa dugsiga laga fasaxayaa marka lagaaro 3:10 PM. **Ardayda waa inaan dugsiga laga wadin kahor xiligas ilaa inay dhakhtar labalan sanyihiin ama xaalad degdeg ah kajirto qoyskooda maahee**. Waalidiintu waa

inay sugaan ilaa waqtiga fasaxa ardayga si ay ugula kulmaan cunugooda albaabka hore waxaana *qasab ku ah inay saxiixaan bixinta cunugooda kahor intaysan wadin*. Haday muhiim noqoto i ardayga uu dugsiga kawado qof aan ahayn waalidkiis/masuulkiisa sharciga ah, waa inuu wataa fasax qoran uuna natusaa aqoonsigiisa sawirku kudhaganyahay xiliga uu cunuga qaadaayo. Ogaysiiska waa inuu kujira waqtiga, sababta wadidada cunuga iyo nambarka taleefanka waalidka/masuulka laga wici karo. **Dhamaan ardayda lakaxaynaayo kahor xiliga fasaxa waa in lasoo mariyaa xafiiska sababo amaan awgood. Fadlan ogoow:** ***Uma ogolaan karno inuu ilmaha gurigga ukaxeeyo qof kayar da'da 18 sano.***

<u>Goobaha Ardaya Laga kaxaynaayo:</u>
K0/K1: Ardayda lugaynaysa waa inay waalidkood ugu yimaadaan fagaaga hore ilinka fasalada K1 oo kuyaala Wadada Pershing Road.
Fasalada K2 iyo 1aad: Ardayda lugaynaysa waa inay waalidkood ugu yimaadaan albaabka geeska oo kuyaala garoonka ciyaaraha ee wadada Pershing Road.
Faslada 2aad iyo 3aad: Ardayda lugaynaysa waa inay waalidkood kula kulmaan albaabka wayn ee kuyaala Centre Street.
Fasalada 4-8aad: Ardayda lugaynaysa waxay kabaxayaan alabaabka wayn oo kuyaala Centre Street.
Caruurta walaalaha ah ee lugaynaysa: Hadaad leedahay ardayda dhigata fasalada 2-3 iyo arday dhigta fasalka K1-1 fadlan usheeg macalimiinta biloowga sanad dugsiyeedka si markaas macalimiintu ugu tagaan ardayga wayn ayna kudaraan walaalihiisa kayaryar oo ay uwada lugaynayaan albaabka dhanka wadada Pershing Road.

<u>Googoynta iyo Soodaahida</u>: Sooxaadirid heer sare ah waa arin aad muhiim u ah si ardaygu guul uga gaaro dugsiga. Inay sijoogto ah dugsiga uyimaadaan ayaa laga doonayaa dhamaan ardayda, marka laga reebo xaaladaha xanuunka iyo xaaladaha gaarka ah, waxaana loo adeegsadaa kago'aaminta kugudbinta ardayga fasalka xigga. Qoraal saxiixan ayna taariikhdu kuqorantahay ayaa laga doonayaa waalidiinta ayagoo sharxaaya sababta ardaygu dugsiga ugu gooyay ama ugasoo daahay si loo aqbalo maqnaanshihiisa. Hadii ardaygu dugsiga kamaqnaado 2 ama kabadan maalmood oo xariir ah cadaynta dhakhtarka ayaa loobaahn karaa. Ardayda dugsiga ugooya wax kabadan 4 maalmood oon fasax lasiin xili dugsiyeed kasta ooy noqotaba waxay waayi karaan buundooyinkoda ama kaarkooda natiijada ama waxay kadhacayaan dugsiga, ayadoo hadba kuxiran aqoontooda waxbarasho. Kadib markuu ardaygu dugsiga ugooyo 3 jeer oon cidna fasax siin, waalidka/masuulka waxaa loodirayaa ogaysiis kahadlaaya xeerka xaadirida ardayga waxaana laga codsan karaa inyy waalidku yimaado shir. 5 jeer oo ardaydu dugisga ugooyo bilaa fasax waxay keeni kartaa inuu arinta soofaragaliyo Xafiiska Googoysnimada ee degmada waxaana kadhalan kara cawaaqibyo kale. Ardayga dugsiga kusoo laabanaaya kadib markuu kudhacay xanuun faafa waa inuu wataa cadayn kasocota dhakhtarka oo sheegaysa in ardaygu dugsiga kulaaban karo kahor intaan loo ogolaan galitaanka fasalka.

Dhamaan ardayda waxaa laga doonayaa inay dugsiga soogalaan XILI SAX AH. Ardayda soodaaha waa inay soomaraan xafiiska wayn waana inuu lascdaa qof wayn oo laga doonaayo inuu saxiixo asagoo ardayga matalayaa uuna qoro sababta uu ardaygu usoo daahay. Arday kasta oo soodaaha wax kabadan 3 jeer hal simistar wuxuu ubaahanayaa in kulnaka waalidka looqabto. Ardayda soodaahida badan waxaa sidoo kale loogudbin karaa xafiiska googoysnimada. Ardayda dugsiga soogala kadib saacada 11:00 AM waxaa looqorayaa inay maalintaas dugsiga ugooyeen.

<u>Cuntooyinka Dugsiga:</u> Quraac iyo qado ayaa maalinkasta laga baxshaa dugsiga Curley School. Maqaayada cuntada dugsiga ayaa ufuran in quraac laga cuno maalikasta oo dugsigu jiro laga bilaabo 8:15-8:35 AM. Dhamaan ardaydu waa inay kaqaybqaataan barnaamijka dugsiga ee quraacda iyo qadada DHMAAN ardayduna waxay xaq uleeyihiin inay helaan quraac bilaash ah. Fadlan kafiiri Kalandarka Qadada ee Boston Public Schools dokhyada cuntooyinka ee bilkasta.

<u>Barnaamijka Dugsiga Kadib/Kahor:</u>
Barnaamijka Dugsiga Kadib ee Curley (CASP) wuxuu biloowdaa 3:10-6:00 PM, maalin dugyeed

kasta oo dhamaystirana waa laqabtaa. Malihin wax barnaamij dugsiga kadib sadexda maalmood ee ardayda xili hore dugaiga laga fasaxo (maalinta kahoraysa maalinta Mahadnaqa iyo labada maalmood ee ugu danbaysa dugsiga). Barnaamijka waxaa lagu baxshaa taageerada layli gurigga, kobcinta aqoonta iyo fursado nashaado ah maalin kasta. Fadlan Lakulan Agaasimaheena Barnaamijka Dugsiga Kadib, Erika Mercado si aad uga hesho macluumaad dheeri ah ama kalaxariir emercado@bostonpublicschools.org.

Dugsiga Curley ayaa sidoo kale baxsha Barnaamijka Dugsiga Kahior oo loosameeyo ardayda subax kasta laga bilaabo 7:15-8:15 waxaana iskuduwa barnaamijka Erika Mercado. Barnaamijkaan wuxuu baxshaa barnaamijyo dhanaka aqoonta, farshaxanka iyo kobcinta bulshonimada ardayda dhigata fasalada K1-5 ayadoo loogu sameeyo usaalaynta "kooxaha". Dhamaan ardayda kaqaybgasha Barnaamijka Dugisga Kahor waa inay buuxshaan codsiga diiwaangalinta waana inay soomaraan xafiiska wayn. Fadlan xasuusnoow *waxaa jiro lacag laga qaadaayo ardayda kaqaybgalaysa*. Barnaamijka oo lacag la'aan ah ayaa laheli karaa markii loobaahdo.

Gaadiidka

Arayda waxaa baska dugsiga kuqorta waaxda dugsiga, ayadoo laga fiirinaayo meesha uu ardaydu kunoolyahay. Ardayda baska raacda waxaa laga doonayaa inay baska dugsiga maalinkasta sooraacaan. Hadii isbadal kuyimaado qorshayaasha ardayga cunugaaguna uusan sooraacin baska dugsiga, fadlan usheeg macalinka fasalka ardaygaaga adoo qoraal ugsoo gudbinaaya. Hadaad qorshayaashaada badashay xili danbe aadana awoodin inaad waraaq soodirto, fadlan wac macalinka UGU DANBAYN 1"30 OM si aan uxaqiijino badqabka cunugaaga. Hadaadan ogaysiis sax ah ama waqtigii kuhaboon lasoo gudbiyay aadan nasiin, waxaa suuragal ah inay muhiim noqoto in cunugaaga lagu daro baskiisa. In ardaygu raaco baska dugsiga waa faaiido. Dhamaan ardayda waxaa laga doonayaa inay kudhaqmaan amarka darawalka dugsiga ayna raacaan xeerarka badqabka ee baska. Inay raaci wayaan xeerarkaas waxay keeni kartaa in loodiido raacida baska sidaas awgeed fadlan kuqasab cunugaaga inuu raaco xeerarka baska dugsiga. Mararka qaar meelo kuwii hore kaduwan oo basku istaago ayaa ladiyaarin karaa. Fadlan laxariir dugsiga si aad macluumaad dheeri ah uhesho.

Baajinta Dugsiga: Mararka qaar waxaa muhiim ah in dugsiga labaajiyo maalintaas sababo laxariira cimilada ama xaalado degdeg ah oo dugsiga kajira. Fadlan xasuusnoow inaad dhagaysato bayaanada sheegaaya in dugsiga labaajiyay kuwaasoo ay soosaaraan BOSTON PUBLIC SCHOOLS.

Buundooyinka/Kaarka Natiijooyinka: Kaararka natiijooyinka ayaa labaxshaa sadex jeer sanadkiiba bilaha Diseembar/Janaayo, Maarso iyo Juun. Macalimiinta faslada 6-8 ayaa gurigga udiraaya Natiijooyinka Hormarka uu ardaydgu sameeyay Bartamaha Simistarka. Fadlan akhri oo saxiix warbixinta kadibna kusooceli dugsiga maalinta xigta. Warbixintaan waxaa lagu darayaa faylka cunugaaga.

Macluumaadka Caafimaadka/Fayaqabka: Macluumaadka caafimaad ee arday kasta ayaa ladiiwaangashaa. Ardayda dhigata dugsiyada Boston Public Schools waa inay maraan baaritaan jirka. Sharciga Massachusetts ayaa sidoo kale doonaaya in ardaygaaga si buuxda lootalaao ayna kujiraan talaaka busbuska. Inaan laraacin sharciyadaas waxay muhiim kadhigaysaa in dugsiga aga saaro ardayga. Waxaa nooshaqeeya labo kalkaaliso oo maalintii oo dhan shaqeeya kuwaasoo kataageeri kara qoysaska wixii baahiyo caafimaad ah.

Keilah Santana:
Ksantana@bostonpublicschools.org
April Pumphret:
apumphret@bostonpublicschools.org

Xeerka Boston Public Schools ayaa qasab kadhigaaya in daawooyinka (ayna kujiraan daawada neeftu) aan ardayda lasiin karin inta lagu jiro maalinta dugsiga ayadoon cadayn qoran laga wadan dhakhtarka, waana inay siisaa daawada kalkaaliso aqoonsi leh. Daawada kaliya oo amarkaan kabaxsan ayaa ah epi-pen, taasoo uu ardayga siin karo shaqaale tababaran oo shaqaalaha kamid ah markay xaalad degdeg ah jirto. Macluumaadkaan waa in lookeenaa kalkaalisada dugsiga, iyo sidoo

kale macalika fasalka gurigga ee ardayga. Waxaa loobaahanyahay in waalidku macalinka fasalka usheegaan wixii xaalado caafimaad oo horay ama hadaba uu abo ardaygu (tusaale, xasaasiyaadka, neefta iwm.).
Fadlan ogoow: Ardayda neefta qaba waxay daawada kadhuuqi karaa tuubada neefta haday wataan cadayn qoran oo dhakhtarku siiyay ayay tababar fiican uqabaan sida loodhuuqaayo. **Aad ayay muhiim utahay inaan ogaano cida dugsigu laxariiraayo haday jirto xaalad degdeg ah. Fadlan xaqiiji in dugsigu haysto nambarka taleefanka ugu danbeeyay ee aad wadato oo lasoo wacaayo xiliyada xaalad degdeg ah jirto.**

Xeerka Injirta: Dugsiga Curley wuxuu raacayaa soojeedinada looga jawaabaayo injirta ay arkaan Waaxda Kalkaalista BPS. Hadii injir uu ku arko ardayga xubin kamid ah shaqaalaha kuliyadu ama waalidka/masuulku uu dugsiga kusoo wargaliyo, kalkaalisada ayaa si degdeg ah loogu wargalinayaa. Kalkaalisada ayaa laxariiraysa qoyska cunuga si ay ugu sheegto ayna/ama ula wadaagto soojeedinada ku aadan daawayntiisa. Caruurta fasalka laga saari MAAYO baaritaan dhamaan madaxyada arda fasalka ahna lama samaynaayo. Hase yeeshee, q=ogaysiis guud ayaa loogu diri karaa gurigga qoysaska ardaydoodu dhigato fasalka si markaas waalidiinta kale uga foojignaadaan xaalada caruurtooda.

Xeerka Cimilada Banaanka: Anagoo raacayna soojeedinada aaxda Kalkaalinta ee BPS iyo heerarka ogolaanshaha NAEYC, dugsiga Curley wuxuu abuuray shurudaha soosocda oo looraacaayo ciyaarta banaanka dugsiga, isticmaalka Saacadaha Daryeelka Caruurta ee Cimilada kuwaasoo noqonaaya tilmaan laraaco. Ardayda ayaa banaanka aadaaya si ay usoo nastaan, uciyaaraan ayna ubartaan waxbarashada jir dhiska markasta ooy macquul tahay. Marka kaliya oo arintaan kareeban waxaa kamid ah:

- Marka rob da'aayo, gugac ama duufaan ay jirto
- Baraf daboola inta badan garoonka/goobta ciyaarta.
- Cimilo qaboow oo kahoosaysa 30 digrii ooa wadata dabayn kusocota xawaare dhan 15 MPH ama kasii badan.
- Cimilo kulul oo kasaraysa 90 digrii ooa wadata huur dhan 60 ama kabadan.

Ardaydu banaanka way ubixi KARAAN marka barafku dhacaayo ilaa inta laheli karo meelo banaanka ooy kuciyaaraan.

Dhamaan ardayda waxaa macalimiintoodu farayaan inay si fiican dharka uxidhaan markay ciyaar iyo nashaado u aadayaan banaanka. Marka aysan sifiican dharka uxiran, waxaa lagu haynayaa gudaha fasalada si looxaqiijiyo caafimaadkooda iyo badqabkooda. Fasalka OO DHAN laguma haynaayo gudaha fasalka sabab laxariirta in ardayda qaar aysan qabin dharkii kuhaboonaan cimilada banaanka. Hase yeeshee, dugsiga Curley waa inuu kormeer kufilan kusameeyaa meel kasta xiliyada oo dhan. Markay jiraan awood shaqaalhuhu uleeyihiin kormeerka, kadhaafida xeerka kor kuxusan ayaa lasamyn karaa.

Hawlo Iskudhafan: Curey waa dugsi balaaran oo leh bulsho kaladuwan. Waxaan soodhawaynaa dhamaan ardayda qoomiyadaheena waxaana udiyaarinay barnaamijyo gaar ah oo lagu taageeraayo ardayda noocyada kaladuwan. Si looxaqiijiyo in dhamaan ardaydu helikaraan manhajka iyo guusha aqoonta, Curley wuxuu adeegsadaa istaraatiijiyado kaladuwan ayna kujiraan casharo kaladuwan iyo shaqooyin istaraatiijiyad kudhisan oo lasiinaayo shaqaale dad waawayn ah si ay utaageeraan una cadaadiyaan ardayda qaab iskudhafan. Waxaa intaas siidheer, Curley wuxuu adeegsadaa qalab kaladuwan si uu ardayda uga caawiyo helitaanka manhajka uuna umaareeyo habdhaqankooda ayna kujiraan boonbayaal, funaanadaha miisaanka, fadhiyada kuraas gaar ah, iwm. Hadii macalinka fasalkaagu ardaygaaga siinaayo qaar kamid ah adeegyadaan, arintaan wuu kuusoo sheegayaa si loo xaqiijiyo siiwadida iyo dhisida guusha ardayga.

Taageerooyinka Habdhaqanka Wanaagsan iyo Hufnaanta: Shaqaalaha dugsiga Curley waxay utaagan yihiin hormarina dugsi leh jawi amaan iyo taageero ayagoo wax uga kaqabanaaya habdhaqanka ardayga qaab cadaalad iyo wanaag leh, ayagoo raacaaya sadexda tiir ee mabaadii'deena: Waxaan DARYEELNAA Nafteena, Midkeenba Kan kale ayuu

DARYEELAA, Waxaana DARYEELNAA Dugsigeena. Hadaan nahay dugsiga Curley, waxaa adeegsanayaa Naqshada Faragalinta iyo Taageerada Habdhaqanka (PBIS) si aan markasta ubarno ardayga waxyaabaha laga doonaayo dhinaca habdhaqanka, aan ugu dabaal degno guulaha ardaygu kakeeno fasalka iyo bulshadeena dugsiga oo dhan aana ardayda kula xisaabtano ilaalinta mabaadii'deena aasaasiga ah. Si aan utaageerno naqshadaan, waxaan abuurnay manhaj dareen bulsho oo dugsiga o dhan ah kaasoo kakooban talaabooyin laga bilaabo *Kulan Furan iyo Xafiiska Sinaanta* ilaa barista ardayda si muuqata xirfadaha iyo xeeladaha muhimka u ah si lootaageero kobacoo dareen iyo bulsho loona tixgaliyo kaladuwanaanta dadka.

Fadlan xasuunoow in mararka marka cunug uu dhibaato aad udaran kuqabo fasalka, xubin kasocota Kooxda Maamulka ayaa laga codsan karaa inuu fasalka yimaado uuna ardayga taageero siiyo. Taageeradaan mararka qaar waxaa si toos ah loogu sameeyaa fasalka dhexdiisa ama hoolka fasalka udhaw. Marka uusan araygu awoodin inuu fasalka dib ugu laabto, waxaa ardayga lagayn karaa fasalka nasiinada si uu ugu nasto, fasax kormeer ah uqaato, uu sameeyo shaqo uu niyadiisa kudajinaayo, ladhiibo haw iyo shaqo xirfadeed si looga taageero inuu udiyaar garoobo kunoqoshada fasalka. Fadlan ogsoonoow, hadafkeena koobaad waa in dhamaan caruurtu joogaan fasalkooda waxbarashada inta badan maalintii ilaa inta macquulka ah. Waxaa intaas siidheer, dhamaan xeerarka noodagsan waxay waafaqsanyihiin Xeerka Anshaxa ee PBS.

Ugu danbayn, fadlan xasuusnoow in DHAMAAN shaqaalaha Curley ay yihiin wariyaal waajib saaranyahay. Hadii cunug uu war usoo sheego xubin kamid ah shaqaalaha Curley taasoo laxariirta amaanka shaqsiga ah ee cnuga gudaha ama banaanka dugsiga, waxaa waajib nagu noqon karta inaan warbixintaas soogudbino.

<u>Xoog-sheegashada:</u> Curley wuxuu raacayaa xeerka BPS uga dagsan xoog-sheegashada. Xoog-sheegashada waxaa lagu qeexaa hanjabaadaha dhanka jirka, hadalka, xariirka ama interneetka laysku mariyo kuwaaso si joogto ah loogu beegsado qofka ayadoo ay jirto iskudheeli tirnaan udhaxaysa gardaroolaha iyo qofka laga gardaran yahay. Hadii waalid, cunug ama macalin uu soosheego xaalad xoog-sheegasho noqon karta, kuliyada Curley waxaa waajib kasaaranyahay inay dhacdadaan maamulka dugsiga gaarsiiyaan/shaqaalaha talobixinta dugsiga. Dhacdada waa labaarayaa waxaana loogudbinayaa degmada waalidkana waxaa loosheegayaa talaabada laga qaaday dhacdada. Qarsoodinimada macluumaadka qoysaska iyo ardayda dhacdadu qusayso waa la ixtiraamayaa. Waalidiinta aya sidoo kale soosheegi kara dhacdo ay u arkaan xoog-sheegasho waxana kusoo gudbin karaan Laynka tooska ah ee Falalka Xoog-sheegashada ee BPS: 617-592-2378.

Xeerka Kayaala Taleefanka Gacanta: Fadlan ogsoonoow in Dugsiga Curley uu raacaayo xeerka BPS ee laxariira isticmaalka taleefanada gacanta dugsiga dhexdiisa. Inkastoo aanaan kudhrigalin qoysaska inay taleefanada u ogolaan inay caruurtooda dugsiga la imaadaan, waxaan fahansanahay inay mararka qaar muhiim tahay in ay taleefan sitaan si waalidku ulasoo xariiraan kahor iyo kadib dugsiga. Taleefanada gacanta ee ardayda waa in loodhiibaa macalinka fasalka biloowga casharada maalintii uuna ardayga uceliyaa marka maalinta dugsigu dhamaato iyo/ama lagu cayaa boorsada ardayga maaintii oo dhan. *Ardaydu waa inaysan isicmaalin taleefanada gacanta ama kuhaysan miiskooda marna inta lagu jiro dugsiga maalintii*. Arday jabiya xeerkaan waxaa lagu amrayaa inay taleefanka udhiibaan macalinka fasalka waalidka ayaana intaas kadib lalaxariirayaa. Hadii ardaygu sii wado kuxadgudubka xeerka, waxaa laga qaadi karaa talaabo edbin ah. Waxaan kaaga mahadcelinaynaa taageerada iyo wadahsaqaynta aad umuujisay xeerkaan.

<u>Tignooloojiyada:</u> Dugsiga Curley wxuu baxshaa tignooloojiyad ay kujiraan Kubuyuutarada Caruurta ee oogle Chromebooks, Smart Boards iyo iPad-yada oo fasalada lagu isticmaalo si meesha looga saaro caqbadaha jira loona taageero dhamaan ardaydu inay helaan heerar dadaal leh iyo manhaj ayadoo la adeegsanaayo mabaadii'da Naqshada Caalamiga ah ee Waxbarashada (UDL). Fasalada dugsiga hoose/dhexe, ardayda ayaa caadiyan kafaaiidaysta tignooloojiyada inta lagu jiro waqtiga casharada si ay ufuliyaan mabaadii'da aasaasiga ah ama u

adeegsadaan baahiyadooda caawimaada. Fasalada dugsiga dhexe, ardayda ayaa u adeegsada tignooloojiyada si ay uga taageerto barashada maadooyinka kaladuwan, ayna kujiraan adeegsiga Google Classroom iyo applicationada taageerada leh ee Google.

Fadlan ogsoonoow inay BPS dajisay tignooloojiyad Google kushaqaysa oo magaalada oo dhan taasoo ah systemkeena macmuulaadka aasaasiga ah ee ardayda iyo shaqaalaha. Tan waxay kadhigantahay in DHAMAAN ardayda BPS leeyihiin ciwaan email ayna usamayso degmada marka ladiiwaangalinaayo. Kadugsi ahaan, waxaan kashaqaysiinaa aana adeegsanaa ciwaanada emailka ardayda fasalada 3-5 si aan ugu sahalno galitaanka applicationada Googleka. Waalidiinta ardayda fasaladaan dhigta waxaa lasiinayaa ogaysiis qoran oo arintaan laxariira ayna kujiraan magca iyo eray sireedka gaarka ah ee cunuga. Ardayda dhigta fasalada K-2 ma helayaan awood ay email ku adeegsadaan laakiin waxay awood uyeelanayaan galitaanka applicationada googleka.

Boston Public Schools waxay sidoo kale leeyihiin Wacyi galin Dhanka Badqabka Interneerka ah kaasoo looga hadlo sida aad cunugaaga uga caawin karto inuu si amaan ah emailka u adeegsado markuu guriga joogo: (http://www.bpscybersafety.org/fresources/email.html). Meel kale oo macluumaad kaheli karto ayna kugula talinayaan BPS ayaa ah www.commonsensemedia.org (isdiiwaangalin lacag la'aan ah ayaa lagaa doonayaa). Waxaan lasoconayaa shaqada ardayga ee dugsiga, laakiin waa muhiim in qoysasku ay kawarqabaan ayna lasocdaan hawlaha isticmaalka ooleenka ee caruurtooda, ayna kujiraan isticmaalkooda emailka markay gurigga joogaan.

Layliga gurigga: Layliga gurigga waa qayb muhiim ah oo kamid ah nidaamka waxbarashada waxaana abuurnay xeer anagoo kaashanayna macalinka iyo waalidka. Xeerkaan wuxuu camimayaa dhamaan fasalada (K-2, 3-5 iyo 6-8). Kooxaha heerarka fasalada ayaa samaynaaya qorshe joogto ah oo laxariira qaybinta layli gurigga, aruurinta iyo mawduuca.

Aaaminaadaha ku aadan layli gurigga:

- Layliga guriggu waa inuu kusaabsanaadaa xirfadaha iyo awoodaha, kuwaasoo la abuuray intii lagu jiray maalinka/asbuuca dugsiga.
- Fikirka laga leeyahay ayaa ah in waxbarashada guriggu ay kor uqaado wadashaqaynta gurigga-iyo-dugsiga, ayna kor uqaado fahanka waxa labaro ardayda ayna balaariso shaqada fulinta, maaraynta waqtiga iyo xifadaha masuuliyad qaadashada.
- Layliga guriggu waa inuusan marna walaac ama niyad jab wayn kunoqon ardayga. Hadii cunugaagu booyaayo intuu kashaqaynaayo layliga gurigga sabab laxariirta layliga oo adag fadlan fariin udir, soo wac ama email udir macalinka.

Hoos waxaa kuqoran xeerka uyaala heerka fasal kasta:

- Ardayda dhigata Fasalada K2-2 waxay lahaanayaan 15 daqiiqo oo ay wax ku akhriyaan habayn kasta iyo 15 daqiiqo oo dheeri ah oo ay kubartaan Xisabta ama ELA. Tani waxay iskunoqnaysaa wadarta guud oo ah 30 daqiiqo oo layli guri ah habayn kasta. In ardaydu wax akhriyaan ayaa lagu dhiirigalinayaa maalmaha fasaxa asbuuca.
- Ardayda dhigata Fasalada 3-5 waxay lahaanayaan 15 daqiiqo oo ay wax ku akhriyaan habayn kasta iyo 15 daqiiqo oo dheeri ah oo ay kubartaan Xisabta, ELA iyo/ama Sayniska. Tani waxay iskunoqnaysaa wadarta guud oo ah 45 daqiiqo oo layli guri ah habayn kasta. In ardaydu wax akhriyaan ayaa laga doonayaa maalmaha fasaxa asbuuca.
- Ardayda dhigata Fasalada 6-8 waxay lahaanayaan 20-30 daqiiqo oo ay wax ku akhriyaan habayn kasta iyo 30-40 daqiiqo oo dheeri ah oo ay kubartaan Xisabta, ELA, Cilmiga Bulshada iyo/ama Sayniska. Tani waxay iskunoqnaysaa wadarta guud oo ah 60 daqiiqo oo layli guri ah habayn kasta. Waxaa laga doonayaa inay maalmaha fasaxa asbuuca wax akhristaan waxaana jiri kara mashruuc waqti dheer qaata kaasoo laga doonaayoinay maalmaha fasaxa asbuuca kudhameeyaan sidookale.

Layli Gurigga Xiliga Fasaxa:

- Ardayda lagama donaayo inay layli guri kashaqeeyaan bilaha Diseembar, Feebaraayo ama Abriil markay fasaxa kujiraan. Hadii shaqada loogusoo diro guriga waxaa loo qaadanayaa buundo dheeri ah xili dugsiyeedkaas. Hase yeeshee waxaa jiri doonaa akhriska xiliga kuleelaha ah oo laga doonaayo dhamaan ardayda dhigata fasalada k-8 bilaha Luuliyo iyo Agoosto.

Tilmaamaha Waalidka:

- Kadhigo layli gurigg ardayga arin muhiim ah.
- Umuuji inaad xiisaynayso shaqada uu hayo cunugaagu.
- Udiyaar meel dagaanaan leh cunugaaga si uu layli gurigga uga shaqeeyo.
- Udiyaari cunugaaga inuu layli gurigga xiliga saxda ah kugudbiyo.
- Tilmaan iyo kormeer sii, laakiin ha usamayn layli gurigga cunugaaga.
- Kudhiirigali inuu maktabada aado.
- Si cod dheer ah wax ugu akhri caruurtaada,muna sheeg caruurta waawayn inay kuwa yaryar wax u akhriyaan.
- Bar cunugaaga siduu iskugu dheeli tiri lahaa samaynta layli gurigiisa, hawlihiisa jimicsiga iyo xiliga nasiinada.

Shirarka Waalidka iyo Macalinka: Dhamaan waalidiinta waxaa laga doonayaa inay sooaadiraan kulan Furan bisha **Sibteembar 27deeda laga bilaabo 5:00-7:00 PM** si ayula kulmaan macalinka cunugooda oo loogu sheego xeerarka iyo hawlaha muhiimka u ah fasalka cunugooda. Shirkar gaarka ah ee qoyska ayaa lagu qabanayaa balamo lasii diyaarshay xili danbe bilaha Diseembar-Janaayo. Balamaha waxaa lagu dhigan karaa ayadoo lawacaayo xafiiska dugsiga ama adoo wacaaya macalinka cunugaaga si toos ah.

Barnaamijka Xgaaga: Xagaa kasta BPS waxay bixisaa barnaamijyo badan, oo aqoon iyo kobcin intaba leh, kuwaasoo loosameeyo ardayda fasalada K1-8. Wakiiladeena tilmaan bixita ayaa macluumaad laxariira fursadaha barnaamijyada xiliga xagaaga ah kukala diraaya gudaha iyo aagagaarka degmada biloowga hore xiliga gu'ga. Wixii macluumaad ah oo kusaabsan fursadaha waxbarashada ee xiliga xagaaga faldna laxariir

Cristina Silva - K-3:
csilva4@bostonpublicschools.org
Sugeily Santos - Fasalada 4-8:
ssantos2@bostonpublicschools.org

Gudigga Waalidka ee Curley (SPC):
Gudigga Waalidka ee Curley ayaa kala shaqeeya maamulaha dugsiga dhisida bulsho dugsi iskudhafan, taageerida munaasabadah dugsiga oo dhan iyo inay dhaqaale u aruurshaan muhiimadaha dugsiga ee kuqoran Barta Gudigga Dugsiga. Gudigga ayaa kulan yeesha bil kasta. Taariikhaha iyo waqtiyada ay kulmayaan way kaladuwan yihiin. **Dhamaan waalidiintu waxay si toos ah xubin uga yihiin SPC waxaana lagu dhiirigalinayaa inay kulnada sooxaadiraan.**

Gudigga Barta Dugsiga (SSC):
Gudigga Barta Dugsigu (SSC) waxay kakooban yihiin waalidiin, macamiliin, iyo maamulaha dugsiga. Doorka kooxda ayaa ah inay maareeyaan hawlaha dugsiga ayna kujiraan ansixinta miisaaniyada dugsiga, abuurista xeerka dugsiga iyo abuurista iskaashato bulsho/jaamacadeed. Doorashooyinka wakiilada Gudigga Barta Dugsiga iyo madaxda Gudigga Waalidka ayaa laqabtay Juun 2018 si aan shaqada ubiloowno.

Su'aalaha makaqabtaa Gudigga Waalidka Dugsiga (SPC) iyo Gudigga Xarunta Dugsiga (SSC)? Madoonaysaa inaad ogaato xiliga iyo qaabka aad ugu biiri karto? Fadlan laxariir Gudoomiyaasha SPC Heidi Brooks (heidibrooks@yahoo.com) ama Jess London-Rand (jlondonrand@gmail.com).

Mutadawiciinta Waalidka/Masuuliyiinta:
Waalidiinta mutadawacnimada samaynaaya waa lagusoo dhawaynayaa Curley markastana waa loobaahanyahay. Waxaan aqoonsanahay inay jiraan qaabab badan oo ay waalidiintu gacan uga gaysan karaan bulshadeena. Caawimaadahaanqaarkood waxaa kamid ah:

- Tbarucaada Dugsiga Kahor/Kadib:
- Tbarucaada Qolka Qadada/Beerta Dugsiga:
- Tabarucaada Fasalka
- Taageerada Socdaalka Ardayda
- Turjumaadaha Hadalka/Qoran
- Iyo WAXYAABO KALE OO BADAN!!!!

Sababo laxariira badqabka, waalidiinta/masuuliyiintu waa inay dhamaystiraan ayna kubaasaan CORI/SORI hubin lahubinaayo shaqsiyadooda kahor intaysan tabarucaad fidin.

Buugaagta casharada: Buugaagta casharada iyo buugta kale ee dugsiga waxaa ardayda lagu caariyaysiiyaa si lacag la'aan ah. Buugaagta waa in si taxadar leh loodhawraa laguna sooceliyaa dugsiga ayagoo badqaba. Waalidiinta ayaa masuul ka ah bixinta qarashka buugaagta luma ama lakharibo.

Dalxiiska Gaaban: Waxaa jiri doona fursado ay ardaydu uga qaybqaadan karaan nashaadaadka kabaxsan dugsiga. Marka arintaasi dhacdo, waalidiintu waa inay akhriyaan ayna saxiixaan waraaqda wadashaqaynta oo faahfaahsan. Majiri doono arday loo ogolaanaayo inuu dalxiis kooban kaqaybgalo asagoon haysan waraaqda ogolaanshaha oo saxiixan. Wicitaanada taleefanka ama fariimaha qoraalka lama ogolaan doono inay badal unoqdaan waraaqda ogolaanshaha saxiixan. Xubnaha waalidka/masuuliyiinka/ qoyska kuwaasoo doonaaya inay caruurta uraacaan dalxiiska gaaban waxaa QASAB ah inay buuxshaan ayna kubaasaan foomka CORI/SORI ayna noqdaan ugu yaraan da'da 18 sano jir.

Macluumaadka Xaaladaha Degdega ah: Waxaan ilaalinaynaa diiwanada macluumaadka qarsoodiga ah ee xaaladaha degdega ah ee arday kasta. Waxaa ugu muhiimsan in dugsigu haysto nambarka taleefanka ee ugu danbeeya ee arday kasta, iyo sidoo kale magaca iyo taleefan nambarka ugu yaraan qofkale oo wayn kaasoo lalaxariiri karo haday timaado xaalad degdeg ah.

HSHIISKA BULSHADA DUGSIGACURLEY

ARDAYDA, QOYSASKA, MACALIMIINTA IYO MAAMULAYAASHA OO SI WADAJIR AH USHAQAYNAAYA

WAXAAN DARYEELNAA NAFTEENA, MIDKEENBA KAN KALE AYUU DARYEELNAA, WAXAANA DARYEELNAA DUGSIGEENA

#CURLEYCARES

ANOO AH ARDAY DHIGTA DUGSIGA CURLEY:

- WAXAAN KAQAYQAADANAYAA ABUURISTA DHAQAN LEH DARYEEL ANOO ILAALINAYAA HIMILOOYINKA DUGSIGA; *WAXAAN DARYEELNAA NAFTEENA, MIDKEENBA KAN KALE AYUU DARYEELNAA, WAXAANA DARYEELNAA DUGSIGEENA*.
- WAXAAN SOO XAADIRAYAA DUGSIGA SI JOGTO AH, WAXAAN IMAANAYAA WAQTIGA SAXDA AH WAXAANA IMAANAYAA ANOO WAXBARASHO DIYAAR U AH.
- WAXAAN AAMINAYAA INAAN GUUL KAGAARAAYO AANA HIGSI WAYN GAARAAYO.
- WAXAAN KAQAYBGALAYAA HAWLAHA INTA LAGU JIRO HORMARINTA WAXBARASHADA; ANOO MARKASTA ISKUDAYAAYA ILAA INTAAN KARO KUNA DHIIRIGALINAAYA ARDAYDA ASAAGAY AH INAY SIDAAS OO KALE SAMEEYAAN.

ANO AH XUBIN KAMID AH QOYSKA/MASUULKA ILMAHA:

- WAXAAN KAQAYQAADANAYAA ABUURISTA DHAQAN LEH DARYEEL ANOO ILAALINAYAA HIMILOOYINKA: *WAXAAN DARYEELNAA NAFTEENA, MIDKEENBA KAN KALE AYUU DARYEELNAA, WAXAANA DARYEELNAA DUGSIGEENA*.
- WAXAAN XAQIIJIN DOONAA IN ARDAYGAYGU SOOXAADIRO DUGSIGA SI JOGTO AH, UUNA IMAADO WAQTIGA SAXDA AH UUNA DUGSIGA TAGO ASAGOO WAXBARASHO DIYAAR U AH.
- WAXAAN NIYADA GASHANAYAA IN CUNUGAYGU GUULAYSANAAYO WAXAANA UDAJINAYAA HIMILOOYIN SARSARE SI AAN UTAAGEERO WAXBARASHADA CUNUGAYGA.
- WAXAAN LASHAQAYNAYAA MACALIMIINTAYDA IYO MAAMULAYAASHA SI AAN UFAHMO YOOLALKA DUGSIGA OO DHAN IYO KUWA WAXBARASHADA HEER FASAL ANA UFAHMO SIDA AAN UTAAGEERI KARO WAXBARASHADA CUNUGAUGA MARKUU GURIGGA JOOGO.

ANOO AH MACALIN DHIGA DUGSIGA CURLEY:

- WAXAAN KAQAYQAADANAYAA ABUURISTA DHAQAN LEH DARYEEL ANOO ILAALINAYAA HIMILOOYINKA: *WAXAAN DARYEELNAA NAFTEENA, MIDKEENBA KAN KALE AYUU DARYEELNAA, WAXAANA DARYEELNAA DUGSIGEENA*.
- WAXAAN LASHAQAYNAYAA BULSHADA CURLEY WAXAANA ABUURAYAA BARNAAMIJYO DHAMAAN DUGSIGA OO DHAN.
- WAXAAN HIMILOOYIN SARE UDAJINAYAA DHAMAAN ARDAYDA AANA AAMINAYAA IN DHAMAAN ARDAYDU GUULAYSANAYAAN.
- WAXAAN KALASHAQAYNAYAA WAALDIINTA WAXBARASHADA CARUURTOODA.

ANOO AH MAAMULE KATISAN DUGSIGA CURLEY:

- WAXAAN KAQAYQAADANAYAA ABUURISTA DHAQAN LEH DARYEEL ANOO ILAALINAYAA HIMILOOYINKA: *WAXAAN DARYEELNAA NAFTEENA, MIDKEENBA KAN KALE AYUU DARYEELNAA, WAXAANA DARYEELNAA DUGSIGEENA*.
- WAXAAN HIMILOOYIN SARE UDAJINAYAA DHAMAAN ARDAYDA, QOYSASKA, MACALIMIINTA IYO MAAMULKA IYO ISKAASHATADA BULSHADA.
- WAXAAN ABUURAYAA GOOB ISKUDHAFAN TAASOO KUFAANAYSA KALADUWANAANSHAHA ARDAYDA IYO QOYSASKA.
- WAXAAN FURSADO MACNO LEH SIINAYAA QOYSASKA SI AY UGA QAYBGALAAN DUGSIYADA IYO WAXBARASHADA CARUURTOODA.

FADLAN HOOS SAXII ADOO CADAYNAAYA INAAD OGOLAATAY HESHIISKAAN.

_____	_____
ARDAYGA DUGSIGA CURLEY	*XUBINTA QOYSKA DUGSIGA CURLEY*
_____	*KATHERINE GRASSA* _____
MACALINKA DUGSIGA CURLEY	*MAAMULAHA DUGSIGA CURLEY*